

OFFICIAL
Somali | Soomaali

Waxaa lagugu martiqaaday inaad naga caawiso qorshaynta aragtida dib u dhiska Carlton Elgin Towers.

Towers-yada Carlton Elgin waa goobta ugu horraysa ee loo aqoonsaday in wax laga qabto iyada oo qayb ka ah barnaamijka dib u dhiska Saraha dhaadheer, ee lagu dhawaaqay 2023 waxayna qeyb ka tahay *Bayaanka Guriyeynta ee Dowlada Victoria*.

Maadaama aad tahay kireyste hore, waxaanu ognahay inaad nala wadaagi karto fikrado qiimo leh oo ku saabsan samaynta guryaha cusub iyo meelaha caamka ah ee soo jiidashada leh, la taaban karo, kuna haboon baahiyaha kiraystayaasha.

Homes Victoria waxaa ka go'an inay noqdaan urur wax dhageysta waxna barta waxayna la tashi la yeelan doonaan kireystayaasha, xubnaha bulshada deegaanka iyo daneeyayaasha inta ay socoto dhisida.

Waayo-aragnimada nololeed ee kiraystayaasha dabaqyada dheer ee dadweynaha waxay gacan ka geysan doontaa qaabaynta habka naqshadaynta si loo gaaro heerar cusub oo la heli karo, waaritaanka iyo isku xirka bulshada iyo xaafadda deegaanka.

Waxaad uga qaybqaadan kartaa online, ama shaqsi ahaan - eeg warqadda ku lifaaqan faahfaahinta.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dib u dhiska Carlton Elgin Towers waxaad booqan kartaa: www.homes.vic.gov.au/carlton-red-brick-towers (need new URL).

Waxa kale oo laga yaabaa inaad rabto inaad ku biirto Guddiga Wadatashiga Bulshada ee mashruucan. Foomka qofkii xiisaynaya uu buuxinayo ayaa laga heli karaa [URL](#), ama Xafiiska Guryeynta ee Carlton. Codsiyada ku biiritaanka waxay xirmi doonaan [XX/XX/XXX](#).